NSW GOVERNMENT

What do I need to know if my child is suspended?

Parent/carer information

# Maxaan u baahan ahay inaan ogaado haddii ilmahayga laga joojiyo dugsiga?

## Macluumaadka xannaaneeyaha/waalidka

### Waa maxay cayrintu?

Cayrintu waa marka dugsigu uu u sheego ardayga inuusan iman dugsiga ilaa wakhti. Ardayda Kindhada dhig xata ilaa Fasalka 2aad waxaa laga yaabaa in laga joojiyo dugsiga ilaa 5 maalmood oo waxbarasho, ardayda Fasalka 3aad – 12aad waxaa laga yaabaa in laga joojiyo ilaa 10 maalmood waxbarashada dugsiga.

Waxaa laga yaabaa inay maamulayaashu ka joojiyaan ardayga marka ardayga dabeecadiisa la saluugay ay u keenayso khatar aan la aqbali karin ama waxbarida iyo waxbarashada.

Maamulayaasha waxaa laga yaabaa inay ka joojiyaan dugsiga ardayda markay iskudayeen inay u maareeyaan dabeecad/o la saluugay siyaalo kale dugsiguna wuxuu u baahan yahay wakhti uu ku qorsheeyo taageerada dabeecada oo ay u qorsheeyeen sidii uu qof walba amaankiisa u dhawri lahaa iyada oo aan ardaygu dugsiga joogin. Maamulayaasha waxaa waajib ku ah qadarinta dabeecada iyo baahida ardayga marka go'aan laga gaarayo in laga joojiyo dugsiga. Haddii dabeecadu tahay mid daran ama arin amaan, waxaa laga yaabaa in ilmahaaga degdeg looga joojiyo dugsiga.

### Maxaa dhacaya haddii ilmahayga dugsiga laga joojiyo?

Maamuluhu waa inuu afka uga sheego ardayga markay ku haboon tahay. Waa inay isla markiiba afka ku wargeliyaan xannaaneeyayaasha ama waalidiinta, meeshii suurtagal ah, ama 24 saac gudahood. Adiga iyo ilmahaagu waa in laydin siiyaa fursad aad kula kulantaan dugsiga oo aad uga jawaabtaan dugsiga ka joojinta. Dugsiga ayaa kalaa shaqeyn doona istiraatijiyadaha iyo taageerada la sameyn doono si loo caawiyo ilmahaaga.

Maamulaha wuxuu sidoo kale ku siin doonaa ogeysiis qoraal ah oo dugsi ka joojinta, kaas oo ay ku jiraan sababaha ilmahaaga dugsiga looga joojiyey, faahfaahinta iyo wakhtiga dugsi ka joojinta.

Inta lagu jiro dugsi ka joojinta ilmahaaga looma ogolaan doono dugsiga. Dugsiga ayaa siin doona taageero ilmahaaga si uu wax u sii barto inta lagu jiro dugsi ka joojinta waxayna la socon doonaan adiga iyo ilmahaaga. Macluumaadka ku saabsan sidii aad u taageeri lahayd ilmahaaga fayoqabkiisa inta lagu jiro dugsi ka joojinta ayaa la helaa.

### Kordhinta dugsi ka joojinta

Haddii dugsi ka joojinta aysan bixin wakhti ku filan oo lagu qorsheeyo taageerada ama ay jirto khatar amaan oo socota oo aan weli la maareyn, maamuluhu wuxuu kordhin karaa dugsi ka joojinta. Xannaaneeyaha/waalidka waa la soo wargelin doonaa ka hor dhammaadka dugsi ka joojinta haddii la kordhiyo.

### Racfaan ma ka qaadan karaa dugsi ka joojinta?

Haa, haddii aad rumeysan tahay inuu maamuluhu sameeyey go'aan aan cadaalad ahayn ama uusan u raacan nidaamka iyo qorshaha si sax ah. Tixraac macluumaadka Racfaanada.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan u doodista ilmahaaga waa la helayaa, sidoo kale Xeerka Bulshada Dugsiga oo sharxaya siyaalaha loola hadlo dugsiyada.

### Waa maxay natiijada kulanka dugsi ka joojinta?

Ilmahaagu wuxuu ku soo noqon doonaa dugsiga ama ka hor taariikhda dugsi ka joojintu intaysan dhammaan. Xiriirkaaga wanaagsan ee dugsiga aad ayuu muhiim ugu yahay maareynta dabeecada ilmahaaga iyo wada sameynta xalal. Ka hor intuusan ilmuhu ku soo noqon dugsiga shaqaalaha dugsiga ee sida dhow ula shaqeeya ilmahaaga ayaa kugula soo xiriiri doona taleefan si loo sameeyo ballanta kulanka natiijada.

Kulanku wuxuu noqon karaa mid ka fool ka fool ah, taleefan ama online qaab siin doona fursada ugu wanaagsan ee wada hadalka wax ku oolka ah. Kulanku wuxuu ku saabsanaan doonaa sidaan kuwada shaqeyn karno si loo taageero ilmahaaga markay dugsiga ku soo noqdaan. Waxaad u soo kaxaysan kartaa kulanka qof taageero ah. Qofka taageerada ahi wuxuu noqon karaa qof ku siin kara iyo/ama ilmahaaga taageero ficil ah ama mid maskaxeed.

Dabeecadaha la saluugay ee u baahan taageero iyo istiraatijiyo ka sii badan, dugsiga ayaa kula shaqeyn doona adiga iyo ilmahaaga si loo sameeyo qorshe lagu taageero oo lagu yareeyo wixii khataro ah. Haddii qorshuhu haddaba jiro, waxaa lagu habeynayaa si uu u taageero ilmahaaga. Qorshahan waa lala wadaagi doonaa shaqaalaha kale ee dugsiga ee taageera ilmahaaga.

### Ka waran haddii dabeecado mar labaad dhacdo?

Haddii dabeecada la saluugsan yahay ay mar labaad dhacdo, maamulaha iyo kooxda taageerada waxbarashada ayaa isku deyi doona siyaalaha lagu taageeri doono waxbarashada ilmahaaga ee laga yaabo inay ku jiraan dugsi ka joojin kale. Tan waxaa laga yaabaa inay ku jirto weydiinta khubaro wasaarada dhexdeeda ah inay ka caawiyaan taageero siinta.

### Macluumaadkee ayaan ka heli karaa dugsiga?

Waxaad weydiin kartaa dugsiga wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan wixii dhacay iyo sababta. Dugsigu waa inuu kuu sharxaa sababta ka danbeysa go'aan kasta, waxa dhici doona iyo wixii la sameyn lahaa haddii ay arini soo baxdo.

### Adeega turjumaanka taleefanka

Haddii aad dooneysid inaad la xiriirtid dugsiga oo aad caawimaad uga baahan tahay Ingiriiska fadlan ka wac adeega turjumaanka taleefanka 131 450, u sheeg luuqadaad u baahan tahay oo weydii xiriiriyaha inuu waco dugsiga. Xiriiriyaha ayaa turjumaan khadka soo gelin doona kaa caawiya wada hadalkaaga. Adeegan lacag lagaama qaadi doono.